



Qalalaasaha Qoyska iyo Guriga

Australiya gudaheeda, qalalaasaha qoyska iyo guriga lama aqbali doono.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waa dembiyo ka soo horjeeda sharciga.

Qofka gala dembiyadaan wuxuu geli karaa xabsi, kii uu yahayba nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac **1800RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Dawlada Australia (Australian Government) uma dulqaadato qalalaasaha qoyska iyo guriga xaalad kasta oo ay tahay.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waxaa ka mid ah hanjabaad ama dabeecad qasadkeedu yahay xukumida lammaanaha iyadoo la sababayo cabsi iyo hanjabaada ammaankooda. Qalalaasaha qoyska iyo guriga waxaa ka mid ah:

- wax ku dhufashada;
- ceejinta;
- u diidida lacag lagama maarmaan ah lammaanaha ama qoyska;
- ka takoorida lammaanaha qoyska iyo saaxiibada;
- caayida ama si joogtaha u eedeeynta lammaanaha;
- ku khasbida lammaanuhu inaad u galmooto; iyo
- u hanjibida carruurta ama xayawaanka la korsodo.

Dumarku waxay leeyihiin xuquuq la mid ah ta ragga.

Shuruucda Australiya gudaheedu waxay ula dhaqmaan dumarka iyo ragga si siman.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu arko wanaag iyo xiriirada ammaan ee qoysaskooda, saaxiibadood iyo kuway jecel yihiin. Qalalaasuhu weligii sax ma aha. Ciddina inay aqbasho ma aha in si xun loola dhaqmo ama loo waxyeleeyo..

Waxaa jira adeegyo dhaqan ahaan xasaasi ah Australiya gudaheeda oo ku caawin kara.

1800RESPECT waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah **www.1800RESPECT.org.au**.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wacitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.